# Annaga

[Dacawadeena Xaqiiqdeeda maxay tahay]

[Xaalka Ummadda Halkee Marayaa Maanta]

[Manhajka Dacwadeena Muxuu Yahay]

[Maxaa Laysku Bahaystaa]

إن الحمد لله نحمده ونستعينه ونستغفره، ونعوذ بالله من شرور أنفسنا ومن سيئات أعمالنا،

من يهده الله فلا مضل له ومن يضلل فلا هادي له، وأشهد أن لا إله إلا الله وحده لا شريك له، وأشهد أن محمدا عبده ورسوله.

﴿يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ حَقَّ تُقَاتِهِ وَلَا تَمُوتُنَّ إِلَّا وَأَنْتُمْ مُسْلِمُونَ﴾ ... [آل عمران: 102]

﴿يَا أَيُّهَا النَّاسُ اتَّقُوا رَبَّكُمُ الَّذِي خَلَقَكُمْ مِنْ نَفْسٍ وَاحِدَةٍ وَخَلَقَ مِنْهَا زَوْجَهَا وَبَثَّ مِنْهُمَا رِجَالًا كَثِيرًا وَنِسَاءً وَاتَّقُوا اللَّهَ الَّذِي تَسَاءَلُونَ بِهِ وَالْأَرْحَامَ إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلَيْكُمْ رَقِيبًا﴾ ... [النساء: 1]

﴿يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اتَّقُوا اللَّهَ وَقُولُوا قَوْلًا سَدِيدًا (70) يُصْلِحْ لَكُمْ أَعْمَالَكُمْ وَيَغْفِرْ لَكُمْ ذُنُوبَكُمْ وَمَنْ يُطِعِ اللَّهَ وَرَسُولَهُ فَقَدْ فَازَ فَوْزًا عَظِيمًا (71)﴾ ... [الأحزاب]

أما بعد،

"هـــذا بــلاغ للنــاس ولينــذروا بــه وليعـــلموا أنمـــا هـــو إلـــه واحـــد وليـــذكر أولـــوا الألبـــــــاب"

Waxaan halkaan ka soo jeedinaynaa baaq aan ku caddaynayno waxa aan rumaysanahay iyo sida aan u fahamsannahay xaqiiqada ugu wayn asaaskana u ah diinta Islaamka, taasoo ah kalimadda lagu soo galo Islaamka ee ah (Ashahaadada) (أشهد أن لا إلـه إلا الله), kalimadaa oo ay Nabiyada oo dhan ula yimaadeen ummadahooda si ay ugu saleeyaan noloshooda dhinac kasta macnaha dhabta ah ee kalimadaa.

Annagu waxan nahay Jamaaca ka mid ah Muslimiinta waxaan qiraynaa macnaha dhabta ah ee (Ashahaadada ) (أشهد أن لا إلـه إلا الله وأن محمدا رسول الله ), Allaah wuxuu nagu galladaystay in aan si sax ah u fahamno macnaha saxda ah ee kalimadda (Tawxiidka) (لا إلـه إلا الله), waxa jirta samanadaan dambe dadka badankii in uu ka lumay macnahii saxda ahaa ee ashahaatinka oo waxa ka haray ay yihiin Erayo Afka laga yiraahdo oo waxa ay ku dhaqmayaan laga helayo wax burinayo kalimada ashahaadada macnaheedii iyo wixii ka dhalanayay. Waa zaman Islaamka uusan ka harin magaciisi mooyaane, Qur'aankana uusan ka harin sawirkiisi mooyaane.

## Dacawadeena Xaqiiqdeeda Maxay Tahay

Kalimada (Ashahaatinka) macnaheeda waxaa lagu soo koobi karaa

*"Allaah mooyee qof kale oo xaq lagu caabudo majiro, Awoodda, xukumka, talada iyo maamulka khalqigiisana asaga umbaa leh."*

Haddaba Ashahaadada in ay Ansax noqoto waxay ku xirantahay sedexdaan Arimood oo is raaca:

**1-** Caqiida sax ah oo qalbiga lagu haysto.

**2-** Cibaada sax ah oo Allaah kaligii loo gudbiyo.

**3-** Shareecada Allaah oo loo hoggaansanaado nolosha qaybaheeda oo dhanna lagu dhaqo.

Qofkii Ashahaatinkaan qiro waxaa laga doonayaa in uu ka fugaado wax kaste oo Allaah lala wadaajinaya cibaadada ama xukunka iyo talada, waa in uu Allaah kaligii caabudaa uuna u hoggaansanaadaa sharcigiisa. Allaah wuxuu yiri:

﴿فَمَنْ يَكْفُرْ بِالطَّاغُوتِ وَيُؤْمِنْ بِاللَّهِ فَقَدِ اسْتَمْسَكَ بِالْعُرْوَةِ الْوُثْقَى لَا انْفِصَامَ لَهَا وَاللَّهُ سَمِيعٌ عَلِيمٌ﴾

***(Qofkii ku kufriya daaquudka Allana rumeeya wuxuu qabsaday xariggii adkaa)***

Daaquudkuna waa Qof kasta oo sheegta in uu leeyahay awood uu wax ku xukumo asaga oon Allaah ka talaqaadan, waa xukun kasta oo aan ku dhisnayn shareecada Islaamka, waa ku xad-gudub xaqa lagu xadkudbo, majirto gardaro ka wayn kana foolxun in Allaah lala wadaajiyo xaqii uu u lahaa in uu u taliyo khalqigii uu abuurtay.

Rasuulkeenii suubanaa (scw) wuxuu yiri:

" من قال لا إله إلا الله وكفر بما يُعبد من دون الله، حرم ماله ودمه،وحسابه على الله. )صحيح مسلم)

*"Qofkii yiraahda Allaah mooyee ilaah kale majiro isla markaana ku kufriya waxii Allaah sokadii la caabudo waxaa xurmoobaya xoolihiisa, maalkiisa iyo dhiigiisa, xisaabtiisana Allaah ayaa leh."*

Arrintaan waxay keensanaysaa in dadka Allaah kaligii ka qaataan wax kasta oo noloshooda La xiriira, asaga ayaa boqorkoodi iyo xaakimkoodi ah, sida ay asaga kaligii cibaadadooda ugu gudbiyaan (salaad, soon…) sidaa oo kale ayaa la doonayaa in ay kala kulmaan Asaga kaligii Nidaamka ay noloshooda ku maamulayaan dhinac kasta …

Allaah waxa uu yiri:

﴿قُلْ إِنَّ صَلَاتِي وَنُسُكِي وَمَحْيَايَ وَمَمَاتِي لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ… لَا شَرِيكَ لَهُ وَبِذَٰلِكَ أُمِرْتُ وَأَنَا أَوَّلُ الْمُسْلِمِينَ﴾

***(Waxaad dhahdaa Nabi maxamadow: salaadayda iyo cibaadadayda iyo noloshayda iyo dhimashadayda waxaa leh Allaha caalamkoo dhan Rabbi u ah)***

Waxaa muhiim ah in la fahmo ulajeedada guud ee Islaamka in ay tahay in la helo ummad si gaar ah loo tarbiyeeyay, ummadaa oo dhisata dawlad nidaamkeedu ka duwanyahay Nidaamyada kale xagga caqiidada, akhlaaqda, sharciga iyo qawaaniinta iyo xiriirka ay la leedahay dawladaha kale. Intaa oo dhanna waa in ay ku dhisnaadan kitaabka Qur'aanka iyo Sunnada Nabiga- (csw). Waa ummad Allaah kaligii ka tala qaadata, wax xalaalaynta iyo wax xarrimidda asaga kaligii ka ogolaata… intaa markii la helo ayaa la dhihi karaa ummaddaa Diin Islaam oo toosan ayay haysataa. Muslimiinta intii ay Islaamka si sax ah ugu dhaqmayeen sidaa ayay u fahamsanaayeen.

Haddaba si loo helo ummad Islaam ah oo tilmaamahaa leh waxaa loo baahan yahay in la dhiso Jamaaca Muslim ah oo marka hore nafteeda tarbiyaysa, nolosheedana ku habaysa Islaamnimada saxda ah, dabadeedna dadka ugu yeerta, kuna sabarta wixii dhib ah ee ku soo gaara.

Qarni kasta oo la joogaba waa la helayaa Jaamaacada noocaas ah sida uu tilmaamayo Xadiiska Nabiga (csw):

""لا تزال طائفة من أمتي على الحق ظاهرين لا يضرهم من خالفهم حتى يأتى أمر الله"

*"Ummadayda lagama waynaayo koox xaqa ku taagan, qofkii khilaafana waxba ka dhibi mayo ilaa laga gaaro qiyaamada"*

Waxaa wax lala yaaba ah in umadahaan Islaamka sheeganaya ay ka daahasoonaato in Allaah kaligii talada ka qaataan oo nidaamka iyo sharciyada ay wadamadooda ku dhaqayaan ay noqoto shareecada Allaah oo kali ah, maadaama ay u rumaysanyihiin Allaah galigii in uu abuuray khalqiga oo dhan aysanna jirin cid ku taageertay abuuridooda, asaga kaligiina uu maamula aduunkaan oo aysan jirin wax idin la'aantiisa dhici kara.

Taasi sow ma keensanayso in aan Arrin la go'aaminin idin la'aantii, sharci aan waafaaqsanayn shareecadiisa in aan la dajin. Allihii wax kasta abuuray, mulkigoodana lahaa ayaa xaq u leh in uu u dajiyo nidaamkii ay ku dhaqmi lahaayeen. Sow kuma haboona in laysu daayo Allaah iyo maamulka khalqigiisa.

Dadka mu'miniinta ahi waxay Allaah ku caabudaan u hogaansanka sharcigiisa sida ay ugu caabudaan salaada iyo soonka, lama kala saari karo shareecada iyo cibaadada qaybaheeda kale. In laysku xukuma kitaabka Allaah waa Astaanta Islaamnimada, diin Islaamna ma taalo meel aan sharciga Allaah laysku xukumaynin …. Allaah wuxuu yiri:

﴿إِنِ الْحُكْمُ إِلَّا لِلَّهِ أَمَرَ أَلَّا تَعْبُدُوا إِلَّا إِيَّاهُ ذَلِكَ الدِّينُ الْقَيِّمُ وَلَكِنَّ أَكْثَرَ النَّاسِ لَا يَعْلَمُونَ﴾

***(Xukunka Allaah kaligii ayaa iska leh, wuxuuna faray in aan la caabudin asaga mooyaane, taasaana ah diinta toosan, laakiin dadka badankii Arrinkaa ma garanayaan)***

Dadka waa in ay ogaadaan in aysan waxba u tarayn haday dagsadaaan sharciyo loo ekaysiiyay shareecadii Allaah, amaba ay soo qaataan qodoba ka mida ah shareecada Islaamka dabadeedna ay ku barxaan sharciyada iyo dastuurada ay dagsanayaan, sida ay sameeyaan dawladaha sheegta Islamaka oo ka soo qaata shareecada Islaamka xeerka qoyska ama qaar ka mida ah xeerka ciqaabta, noloshooda inteeda kalana ku maamula qawaanin iyo sharciyo ay ka soo qaateen dastuurada iyo sharciyada dawladaha gaalada ah.

Shareecada Islaamka waa nadaam dhamaystiran oo nolosha qaybeheeda kala duwan u dajiyay qawaaniin cad cad oo meel ay dhaaftay aysan jirin laga bilaabo habdhaqanka khaaska u ah qof kasta, xiriirada iyo macaamilka uu layeelanayo dadka kale… ilaa laga gaaro dawladda muslimka ah nadaamka ay ku dhaqmayso xag dhaqaale, siyaasad, Arrima bulsho iyo cilaaqaadka ay la yeelanayso dowladaha kale waqtiyada dagaalka iyo nabadda.

Arrimahaa oo dhan sharciyada loo dajinayo iyo qawaaniinta kala hagaysa waa in laga soo qaataa kitaabka Qor'aanka iyo Sunnada Nabiga –(csw).

Qofkii aan saa yeelin xukumkiisa Qor'aanka ayaa si cad u sheegay. Allaah wuxuu yiri:

﴿وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ ﴾

﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ﴾

﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْفَاسِقُونَ﴾

***(Qofkii aan wax ku xukumin Allaah wuxuu soo dajiyey waa gaal…waa daalim…waa faasiq)***

Qofka sidaa sameeyay in Allaah ku xukumo gaalnimo iyo wixii ka dhalanayo waa arrin iska cad oo la fahmi karo , sababtoo ah qofka diiday in uu wax ku xukumo kitaabka Allaah waa qof diiday in uu Allaah xaq u leeyahay in uu sharci u dajisto khalqigii uu abuurtay , sheeganayana in Allaah badalkii asaga sharciga laga qaato , hadduusan afka ka oran wuxuu ku caddaystay diidmadaa ficilkiisa , diidmada ficilka ayaana ka xoogbadan diidmada afka, sidaa ayuuna Qur'aan ugu xukumay in uu yahay gaal dulmilow ah oo faasiq ah , maadaama uu faragishtay Allaah xaqii uu lahaa marka uu sheegtay in uu xaq u leeyahay sharcidajin aan xagga Allaah idan looga haysan.

Waxaa jirta arrin kale oo in la ogaado ay muhim tahay, Diinta Islaamka Allaah waa dhamaystiray, xag caqiida xag cibaaado iyo xag sharciba, waxna lagama badali karo, qofkii yiraahda wax baan ka badalayaa haba yaraatee waxaase waa asagoo diintii oo dhan inkiray, maxaa yeelay wuxuu inkirayaa Allaah wuxuu sugay oo ah in uu dhamaystiray Diinta.

Allaah wuxuu yiri:

﴿الْيَوْمَ أَكْمَلْتُ لَكُمْ دِينَكُمْ وَأَتْمَمْتُ عَلَيْكُمْ نِعْمَتِي وَرَضِيتُ لَكُمُ الْإِسْلَامَ دِينًا.....﴾

***(Maanta Ayaan idin dhamaystiray Diintiina, waana idiinku taamyeelay Nicmadayda, waxaana idinkaga raali noqday in aad Islaamka Diin ka dhigataan)***

Sidaa darteed qof kasta oo inkira wax ka mid ah asallada ama faracyada Islaamka waa gaalnima aan dood lahayn. Dadka dhahaya shareecada Islaamka casrigaan laguma dhaqmi karo, ama waxay u baahantahay

waxyaaba lagu soo daro si loola socodsiiyo waayaha cusub.. Taasi macnaheedu waxa weeye Allaah ma ogayn waxa imaandoono (**xaashaa Lillaahi**)

Gabagabada qodobkani waxa weeye in ay dadku u baahanyihiin in loo caddeeyo macnaha Tawxiidka iyo waxa ka dhalanaaya kalimada ((**Ashahaadada**)) ee afka ay ka oranayaan, waxaa dhab ah in uu ka lumay macnihii saxda ahaa ee tawxiidka, dabadeedna ay ku dheceen waxayaabo badan oo shirki iyo kufri ah, sidaa darteedna looga baahan yahay dadka dacwada xaqa ahi ku hawlan in ay dadka uga bilaabaan fahamsiinta Tawxiidka.

Nabi moxamad iyo Nabiyaashii oo dhan- (csw)- waxay ka bilaabi jireen dacwada sixidda caqiidada.

Waxaa dhab ah in ay maanta u baahanyahiin umadaha oo dhan in mar labaad loo soo bandhigo Islaamkii saxda ahaa xitaa umadihii ku hoosnoolaan jiray xukumka Islaamka hase ahaatee labadii qarni ee ugu dambeeyay dawladihii gaalada ahaa intay gumaysteen ay ka tureen ku dhaqankii shareecada Islaamka uguna badaleen sharciyadoodii iyo qawaaniintoodii.

## Xaalka Ummadda Halkee Marayaa Maanta

Umadaha adduunka oo dhan waxaan arkaynaa in ay ka leexdeen ka talaqaadasha Allaah, ayna ka doorbideen in ay ku noolaadaan nidaamyo iyo fikraada bani-Aadam samaystay, waxaynaba u arkaan in haddii Diinta Allaah kaligeed lagu dhaqmo taasi ay keenayso dhib u dhac, oo waxay leeyihiin diinta waayihii lagu dhaqmi jiray munaasib ayay u ahayd duruufta waagaa jirtay, anaguse manta duruuf kale ayaa na haysata sidaa darteed xaq waxaan u leenahay in aan qaadano wixii na anfacaayo.

Ummaddii Islaamka ku dhaqmi jirtay in halkaa la gaarsiiyo afkaarta noocaa ahna ay rumaysato meel cidle ahi Kama iman ee waa shirqool qota dheer ee uu u dagay cadawgeeda ay hormuudka u yihiin yahuudda, kirishtaanka iyo intii raacday.

Qarniya badan ayey ku hawlanaayeen dajinta shirqoollo arrintaa ku aadan waxaana u suuragalay fulinta shirqooladaa oo waxay ku guulaysteen fasaadinta figradaha iyo aragtiyada dadyowga aduunka oo dhan, taasaana u shahashay in ay hogaanka u qabtaan dawladaha oo dhan xagga dhaqaalaha ,siyaasadda ,dhaqanka ,warbaahinta iyo milatari ahaanba, waana midda keentay in ay ka fogeeyaan ummadihii oo dhan diinta Allaah.

Annagu waxaan si fiican u fahamsanahay xaqiiqda dagaalka ka dhaxeeya Xaqa iyo Baadilka, waxaana ka tusaale qadanay kitaabka Allaah oo si faahfaahsan muslimiinta ugu soo bandhigay olajeedooyinka dhabta ah ee cadowgooda la damac sanyahay. Sidoo kale **SIIRADA** Nabi moxamed –(csw)- waxaa ku cad sidii uu u maareeyay una fashiliyay jilaafooyinkii gaalada u dhigayeen jamaacadii ugu horaysay muslimiinta ee uu **RASUULKA** barbaarinaayay. Waxaana si fiican u dareensanahay in uu yahay dagaalka ay ku hayaan gaalada dadka muslimiinta ah mid u dhaxeeya Kufri iyo Iimaan, cadowga Allana waxay ula dagaalamayaa mu'miniinta ay tahay Rumaynta Allaah ay rumeeyeen iyo ku dhaganaashaha caqiidadooda ... Allaah wuxuu yiri:

﴿وَمَا نَقَمُوا مِنْهُمْ إِلَّا أَنْ يُؤْمِنُوا بِاللَّهِ الْعَزِيزِ الْحَمِيدِ﴾

**(*Wax kale kuma qoonsan aan ahayn rumaynta ay rumeeyeen Allaha caziizka ah ee la mahadiyo*)**

Mana ka joogsanayaan la dagaalanka mu'miniinta ilaa ay ka soo leexiyaan Islaamnimadooda una soo celiyaan gaalnimadii Allaah ka soo badbaadiyay ...Allaah wuxuu yiri:

﴿وَلَا يَزَالُونَ يُقَاتِلُونَكُمْ حَتَّى يَرُدُّوكُمْ عَنْ دِينِكُمْ إِنِ اسْتَطَاعُوا﴾

**(*Ka daalimayaan inay idinla dagaalamaan ilaa ay idinka saaraan diintiina haddayba awoodaan*)**

Waa Sida ay ku yiraahdeen gaaladii hore Nabi shucayb- (CS):

﴿لَنُخْرِجَنَّكَ يَا شُعَيْبُ وَالَّذِينَ آمَنُوا مَعَكَ مِنْ قَرْيَتِنَا أَوْ لَتَعُودُنَّ فِي مِلَّتِنَا﴾

**(*Shucaybow adiga iyo kuwa ku raacayba waan ka saaraynaa magaladeena ama waad u soo noqonaysaan diinteena*)**

Dagaalkani maalinba maalinta ka danbaysa waa sii caddaanayaa daaha ayaana laga qaadayaa, asagoo waayadii hore la dabooli jiray si qarsoona loo fulin jiray. Dagaalka nuxurkiisana waa mid ka dhexeeyo laba caqiido, laba habnololeed, wuxuuna loolanka dhex marayaa muslimiinta doonaya in ay ku noolaadaan Islaamnima sax ah oo ku dhisan caqiido toosan oo dhinac ah iyo dhindca kale oo ah cadaw isasoo bahaystay oo ah Yuhuud, Kirishtaan, Majuus, Shiica iyo kuwoo Islaam sheegta dabadhilifna u ah cadowgaa.

## Manhajka Dacwadeena Muxuu Yahay

Jamaacadaani waxay u istaagtay xaqiijinta ulajeedo qaali ah taaso ah in ummadda mar labaad loogu yeero si sax ah inay nolosheeda ugu xaqiijiso waxa ay keensanayso kalimada astaanta u ah Islaamka oo ah (لا إلـه إلا الله), (**Allaah *mooye ilaah kala majiro***), Ayna si dhab ah u fahmaan xaqiiqada tawxidka sida ku cad kitaanka Allaah iyo Sunnada Nabiga- (csw).

Waxaan wada ogsoonahay in qarnigii 20aad ee aan soo dhaafnay bilaawgiisii la burburiyay khilaafadii Islaamka ee ugu dambaysay, halkaana ay muslimiinta ku waayeen dalladii Islaamka ahayd ee ay hoos harsanayeen, isla markaana dawladihii gumaysiga ee kala qaybsaday ummaddii muslimka soo ahayd qarniyo badan ay ka tureen shareecadii Islaamka ee ay isku xukumi jireen, halkaana waxaa ku soo Afjarmay umad Islaamka isku xukunto,oo hoos harsata dallad Islaam, waxaana u badalay in ay hoos harsadaan dallada jaahili ah noloshoodana lagu hago dastuur, sharciyo iyo qawaaniin jaahili ah.

Xaalka marka uu halkaa marayo waxaa loo baahnaa in la helo dad u istaaga dacwo Islaam oo raacda manhajkii iyo habkii nabiyaasha dacwadoodu ka bilaabi jireen oo ah dadka marka hore laga dhiso caqiidada. Haddaba jamaacadan waxay go’aansatay in ay xilkaa dhabarka u ridato, xilkaa oo uu Allaah nagu waabjib yeelay annaga iyo muslimiinta oo dhan samanka aan joogno iyo waqti kasta oo duruufahan oo kale ay jiraan... Allaah wuxuu yiri:

﴿قُلْ إِنِّي لَنْ يُجِيرَنِي مِنَ اللَّهِ أَحَدٌ وَلَنْ أَجِدَ مِنْ دُونِهِ مُلْتَحَدًا, إلا بلاغا من الله ورسالاته﴾

***(Nabi maxamadow waxaad tiraahdaa qof Allaah iga badbaadin kara ma jiro, meel aan Allaah kaga gabadana ma jirto oo aan ka ahayn in aan Allaah risaaladiisa dadka gaarsiiyo)***

Aayad kalana Allaah wuxuu ku yiri:

﴿ادْعُ إِلَى سَبِيــــــــــلِ رَبِّــــــــــكَ بِالْحِكْــــــــــمَةِ وَالْمَــــــوْعِظَــــــــةِ الْحَسَــــــــــنَةِ﴾

***(Jidka rabbigaa dadka ugu yeer adigoo isticmaalayo xikmad iyo waano wanaagsan)***

Annagu jamaacadeena jiritaankeeda iyo sharci ahaanteeda waxaan ku salaynaynaa shareecada Islaamka iyo nadaamkeeda, mana ka sugayno ogolaasho sharciyada iyo Nadaamyada jaahiliga ah, waa waajib uu Allaah na saaray cid kalana fasax uga raadsanmayno.

Sidaa darteed jaamacadeenu waxay leedahay maamul u gooni ah iyo hogaan u madaxbanaan, xubnaheedana waxaa ka dhexeeya iskuxirnaan iyo walaalnimo Islaam, ulajeedadooduna tahay iskaalmaysi sidii dadkoo dhan loogu yeeri lahaa tawxiidka Allaah iyo isku xukumidda shareecadiisa, mana aha mujtamaceena oo kali ah ee waa aduun waynaha oo dhan si diinta Allaah ay u wada gaarto khalqigiisa meel kasta uu joogo.

Annagu markaan habkaa dacwada u hirgalinayno waxaan si buuxda ugu dayanaynaa tilaabooyinkii ay qaaday jamaacadii hore ee Nabigu dhisay, oo waxaa lagama maarmaan ah in aan ka bilawno meeshii uu Rasuulka –(csw)- ka bilaabay aanna ku socono isla tilaabooyinkii uu qaaday, taasina waxay waajib nooga dhigaysaa in aan qaadano mabda’a ah “**Tadaruj**”(**tilaabo tilaabo**) oo uu Rasuulka isku laasimiyay markuu dhisaayay ummadii muslimka ahayd, dhismahaa uu marsiiyey marxalado kala duwan ilaa ay ka gaartay heerkii ugu sareeyay.

Halkaa waxan ka garanaynaa in lagama maarman ay tahay in dacwadu marto marxalada kala duwan, arrintaan oo ay ka tilaabsadeen in badan oo ka mid ah dhaqdhaqaayada ku hawlan dacwada Islaamka.

Haddi la doonayo in laga saaro Islaamka ((**Qurbada**)) labaad ee ku habsatay casriga aan joogno waa in loo maro hab marxalada is dabajooga oo is dhamaystirayo, marxalad kastana ay leedahay ulajeedooyin gaar ah iyo hababkii lagu xaqiijin lahaa ulajeedooyinkaa.

Waxayna u baahantahay ((**Fiqhi**)) khaas ah (**habka loo fulinayo waajibaadka diinta**) oo munaasab u ah duruufaha ka jira marxaladdaa, Fiqhigaa oo ku salaysan qawaacidda sharciga ah iyo asallada sugan ee laga soo qaatay kitaabka Allaah iyo Sunnada Nabiga – (csw).

Baahida loo qabo in la maro marxalado is dabajoog ah waxay si cad kuugu muuqanaysaa marka aad is hor dhigto ulajeedada guud ee ay leedahay Jammaacada Muslimka ah, taasoo ah in dadka loogu yeero in ay Allaah caabudaan asaga kaligiina ka tala qaataan.

Haddaba tallaabadii ugu horaysay ee uu qaaday Rasuulka- (csw) -waxay ahayd in uu u yeeray dadka kuwii ugu dhawaa oo ah qaraabadii iyo saaxibadii asagoo qof qof ula kulmaayo arrintiisana ka qarsanayo umadda inteeda kale , sidaa ayayna ugu suuragashay in uu abuuro unuggii ugu horreeyay Jamaacada muslimka ah oo ahaa kooxdii si fiican ula fahamtay nuxurka dacwadiisa, quluubtoodana uu Iimaan ka buuxsamay oo ay ugu diyaar garoobayaan in ay qaadaan xilalka ku soo food leh marxaladaha soo socda.

Annagoo ka shidaal qaadanayno talaabooyinkaa uu qaaday Rasuulka -(csw) , kuna dayanayna habkii uu u dhisay jamaacadiisii koobaad , Ayaan go’aansanay in aan raacno habkaa, waxaana rumaysanahay in ay tahay arrintaasi midda noo suuragelisay in aan Tarbiyayno xubnaha Jamaacadeena nufuustoodana aan ka nadiifino waxyaabaha ay ka dhaxashay nolosha jaahiliga , iyo in ay si qoto dheer u fahmaan qadiyadda ay aamineen ayaga oo ka fugaanaya in ay isku furaan buuq iyo dood ay la galaan dadwaynaha ilaa ay arrintooda si dagan uga baaraandagayaan uguna diyaar garoobayaan marxaladaha soo socda .

Markii uu dhamaystirmo dhismaha unugaa uuna noqdo mid awood u leh in uu la hadlo dadweynaha soona bandhigi karo xaqa si cad uusan mugdi ku jirin, Islamarkaana ku sugnaan kara, dhib kasta oo soo foodsaarana ku sabri kara, markaa ayay Jamaacada soo shaac baxaysaa, Si loo helo tusaale la arki karo oo ka tarjumaayo fikradda ay soo bandhigayso, markaa ayay ummadda arkaysaa dad kula nool mujtamaca casriga ah kuna guulaystay ku dhaqanka Islaamkii saxda ahaa.

Waxaa lagama maarmaan ah marxaladda ay dacwada bilawga tahay in baaqeeda uu ku koobnaado Tawxiidka khaaliska ah iyo dadka say u fahmi lahaayeen xaqiiqda “لا إلـه إلا الله".

Mana habboona in dadka dacwada wada ay la yimaadaan ficillo dadka ka xijaabo in ay arkaan xaqiiqada, ama ay ku dhaqmaan waxyaaba Jaahiliyadda fursad u siinayo in ay dicaayad ku furto xaqa.

Anagoo ka tusaala qaadanayno arrinkaa , iskuma mashquulin waxyaabaha ay isku mashquulinayeen Jamaacaadka Islaamka badankood ayagoo isku dayaaya in ay xukunka qabsadaan ama ay u sii dhawaadaan ayagoo u sii maraya nidaamyada ay u dagsatay jaahiliyada, sida ka qaybgalka golayaasha sharcidajinta ( **Baarlamaanada** ) iyo Afgambiyada militari amaba dagaal hubaysan oo aan waqtigiisi la gaarin, dhinaca kalane waxaa jira Jamaacaad isku mashquulinaya ka wacdinta dadwaynaha “**Munkaryada**” ku faafsan mujtamaca kuwaasoo asal ahaanta ka dhashay “**Munkarka**” wayn ee ku jira noloshooda oo ah Shirkiga iyo Kufriga.

Waxaanu ognahay arrimahaa ay isku mashquulinayaan Jamaacooyinka kala duwan in ay yihiin tilaabooyin lala degdegay oo khilaafsan manhajkii Rasuulka- (csw). Waxay naga leexinayaan in aan ku mashquulno fahamsiinta Ummadda “**Macruufka**” ugu wayn oo ah Tawxiidka Allaah lagu kaliyeelayo cibaadada qaybaheeda oo dhan: “**Shacaa’irta**” (sida Salaada, soonka, IWM) iyo “**Sharaa’icda**” (sharciyada, qawaaniinta, dastuurada, IWM).

Sidaa darteed, annagu marxaladdan waxaan ku mashquulsanahay dacwada iyo tarbiyeenta dadka qaata xaqa aan ugu yeerayno.

Jamaacooyinka Islaamiga ah ee ku hawlan dacwada, ummadana ugu yeeraayo in laysku xukumo shareecada Allaah iyo koryeelidda kalimada Allaah , hase ahaatee aan manhajkii Rasuulka siduu ahaa aan u raacin, waxay xaq noogu leeyihiin "**Wilaaga**" caamka ah ee muslimiinta ka dhexeeya , waan u ducaynaynaa in uu Allaah waafajiyo Tawfiiqda ,waan la xanuunsanaynaa cadaadiska iyo dagaalka gardarada ah ee Jaahiliyada ku hayso , laakin annagu ma awoodno in aan Isla saanqaadno oo aan isku hab u wada shaqeeno,sababtoo ah waxaan u aragnaa in uu manhajka ka qaldan yahay habka ay dacwada u wadaana uusan sax ahayn.

Dacwadeenu marxaladda la taaganyahay waa in ummadda loogu yeero Allaah kaligii in la rumeeyo loona caddeeyo waxa ka dhalanaayo xaqiiqdaa oo ah isbadal baaxad wayn oo ay ku sameeyaan hab nololeedkooda. Annagoo aan waqtigaan xaadirka ah la galaynin loolan xagga xukunka ah talisyada hadda jira , si fursad loo siiyo dadwaynaha in ay si fiican u fahmaan xaqiiqada loogu yeeraayo , Jaahiliyaddana aanay fursad u helin ay ugu sawirto arrinka in uu yahay xukundoon , waxaan doonaynaa Ummadda in ay aragta xaqdoonnimadeena, niyad wanaageena , isla markaana ay naga go'an tahay ku dhaganaashaha jidka dacwada annagoo marna aan nagala helaynin dabacsanaan iyo cabsi, ilaa uu Allaah Arrinkeena ku xukumo siduu doono ,annaga iyo qomkeenana uu xaq nagu kala saaro.

In ka badan Afartan sano ayaan ku soconay jidkaan aanan dhinacna uga leexan oo xaqaa ayaan isku tarbiyaynaynay, haweenkeena iyo awlaadeena waxaan ku barbaarinaynay in ay ku dhaqmaan sida uu Allaah naga doonayo, shareecadiisana aan nafteena ku fulino inta karaankeena ah anaga oo ku dhex nool mujtamac Jaahili ah, dhinaca kalena ku jirna marxaladdii koobaad ee "**Sirriga**" ahayd (**marxaladii isqarinta**).

Hadda waxaan dareemaynaa in aan soo gaarnay waqtigii aan u gudbi lahayn marxala labaad ee xaqa lala soo banaanbaxayo, Allana waxaan ka rajaynaynaa in uu noogu kaalmeeyo gudashada amaanadaa.

Dadwaynow na dhagaysta, quluubtiinana noo fura , Allaah ayaan marqaati gashanaynaa in aanan idinka doonaynin abaalgud iyo magac iyo maamuus, ajarkeena waxaan ka doonaynaa Allaah – sareeyee, waxa aan idinku yeerayno waa liibaan aduun iyo nimco aakhiro…

Allaah wuxuu yiri:

﴿مَنْ عَمِلَ صَالِحًا مِنْ ذَكَرٍ أَوْ أُنْثَى وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَنُحْيِيَنَّهُ حَيَاةً طَيِّبَةً وَلَنَجْزِيَنَّهُمْ أَجْرَهُمْ بِأَحْسَنِ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ﴾

***(Qofkii sameeyo camal wanaagsan- rag iyo haweenba- asaga oo muumin ah, nolol wanaagsan ayaan noolaynaynaa aduunka, aakhirana waxaan ku abaal marinaynaa wixii ay camal fasheen Kan ugu wanaagsan)***

Diinta Allaah – sareeyee – haddii lagu dhaqmo ma aha in la waynayo horumarka xaga cilmiga iyo teknolajiyada uu Allaah u furay bani Aadamka qarniyadaan dambe, balse Allaah asagaaba ka codsanayo insaanka in ay la soo baxaan kayraadka uu ugu diyaariyay dunida korkeeda, wuxuuna farayaa in looga faa’iidaysto horumarkaa wixii nacfi u leh dadka ee aan lala aadin xagga Sharta, hadaba maxaa looga baqayaa in lagu dhaqmo shareecada Islaamka?

Dadkeeniyow… annaga naga dhagaysta dacwadeena xaqiiqdeeda waxa ay tahay, hana rumaynina waxa nalaga sheegaayo (**AF jooga looma hadlo**) anaga ma nihin koox dadka laysa oo argagixisa ah, ma nihin (khawaarijta **casrigaan**), uma istaagin qof inaan dhib u gaysano, dhiigiisa banaysano, xoolahiisa xalaalaysano, sharaftiisa wax u dhinno…

## Maxaa Laysku Bahaystaa

Annagu waan diidannahay fikradaha jaahiliga ah ee dadka isugu bahaystaan hadba wixii isku midib ah ama isku jinsi ah ama isku wadan ah. Allaah –sareeyee- wuxuu kitaabkiisa ku sugay, Rasuulakana ku caddeeyay Sunadiisa in caqiidada saxda ah ay tahay midda kali ah ee in lagu midooba mudan, carabnimo, cajaminimo, caddaan iyo madow midna laguma kala fadli badna, Taqwo Allaah unbaa lagu kala sareeyaa. Qaraabanimada, isla dhalashada iyo tolnimada wax qiima ah ma laha haddi ay caqiidada iyo diinta is khilaafto.

Sidaa ayaan ka baranaynaa Qur’aanka iyo Sunada... Allaah wuxuu yiri:

﴿إن هــــذه أمتكـــــــم أمـــــة واحـــــــدة وأنا ربكـــــــم فاعبـــــــدون﴾

***(Tani waa ummaddiina waana hal ummad, aniga ayaana Rabbi Idiin ah ee I caabuda)***

Waxa kale uu yiri:

﴿إن أكرمكـــــم عنـــــــد الله أتقـــــــاكـــــم﴾.

***(Kan Allaah agtii idinku karaama badan waa Kan idinku taqwo badan)***

Waxa kale uu yiri:

﴿لَا تَجِدُ قَوْمًا يُؤْمِنُونَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ يُوَادُّونَ مَنْ حَادَّ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَلَوْ كَانُوا آبَاءَهُمْ أَوْ أَبْنَاءَهُمْ أَوْ إِخْوَانَهُمْ أَوْ عَشِيرَتَهُمْ.......﴾

***(Ma helaysid qolo Allaah iyo aakhiro rumaysan oo jeclaanayso qof dhinac maray Allaah iyo Rasuulkiisa haba ahaadeen aabayaashood ama wiilashooda ama walaalahood ama tolkooda.)***

Nabigana wuxuu yiri (csw):

""لا فضـــــــــــل لعـــــــــربي على أعجـــــــــمي ولا لأبيـــض على أحمـــر إلا بالتقـــــوي"

*"Carab kama fadli badna cajam, caddaana Kama fadli badna guduud, Taqwo uun bay ku kala fadli badan yihiin."*

Xarigga caqiidada haddu guntamo mu'miniinta dhammaantood waa walaalo yaysamba isku nasab ahaanine:

﴿إِنَّمَـــــــــا الْمُؤْمِنُـــــــــــــــونَ إِخْـــــــــــــوَةٌ﴾

***(Mu'miniinta ayaga umbaa walaala ah)***

Wadan kasta oo muslimka kala dagaalamayo caqiidadiisa, diintiisana ka horjoogsanayo, Shareecada Islaamka hirgelinteedana jilaafaynayo, wadan uma aha qofka muslimka ah haba daganaadeen ehelkiisa iyo tolkiisa, ama ha u yaalo maalkiisa iyo danahiisa kale.

Dhinaca kalane wadan kasta oo haysta caqiidadiisa, shareecada Islaamkuna ku dhaqmaayo waa wadankiisi yuusanba ku lahaanin ahal, tol iyo Dana aduun. Arrinkani ma aha waxan annagu iska amaamudayno ee waaba lafdhabarka caqiidada Tawxiidka.

Cadowga Islaamka arrintaa si fiican ayuu u fahamsan yahay oo dagaalka maanta dunida ka aloolsan waa kaa. Wadamada la burburinaayo waa kuwii Islaamka uu xukumi jiray gaaloo dhanna ay isugu soo bahaysatay tirtiridooda, meel kasta oo koox muslim ah laga sheegana waxaa loo abaabulayaa gaashaanbuur la dagaalanta ayagoo loo bixinayo magacyo dadka lagu necbaysiiyo, danta gaaladana waxa weeye in aaysan ka dhismin dunida meel ka mid ah dawlad Islaam ah oo si dhab ah ugu dhaqanta shareecada Islaamka.

Waa wax lala yaabee maxay u dhici la'dahay mar uun in uu shaqeeyo caqliga bani-Aadamka oo ay gartaan in ay u soo noqdo Allihii Abuurtay, garanayana waxa ayaga anfacayo, sidaa darteedna sow kuma haboona in ay aqbalaan hanuunka loogu yeerayo!!!

*Dadwaynow*:

﴿اسْتَجِيبُوا لِرَبِّكُمْ مِنْ قَبْلِ أَنْ يَأْتِيَ يَوْمٌ لَا مَرَدَّ لَهُ مِنَ اللَّهِ مَا لَكُمْ مِنْ مَلْجَإٍ يَوْمَئِذٍ وَمَا لَكُمْ مِنْ نَكِيرٍ﴾

***(Rabbigiina ajiiba intuusan idin imaan maalinka aysan jirin wax celi Kara amarkaa Allaah, meel aad ku gabataana aysan jirin, qof idiinka daaafacane uusan jirin)***

Anagu waxaan hubnaa in laga hor imaandoona dacwadeena, sababtoo ah dunida oo dhan waxaa majaraha u haaya cadowga Islaamka, asaga ayayna ka amarqaataan dawladaha gobolka iyo kuwa caalamka kale intuba.

Rasusha Allaah sidaa si la mid ah ayaa loo beenin jiray:

﴿وَإِنْ يُكَذِّبُوكَ فَقَدْ كُذِّبَتْ رُسُلٌ مِنْ قَبْلِكَ وَإِلَى اللَّهِ تُرْجَعُ الْأُمُورُ﴾

***(Haddii ay kuwaan ku beeniyaan Nabi maxamadow waxaa la beeniyey Rusushii kaa horaysay, Allaah ayayse arrimaha ku dambayn doonaan)***

Jaahiliyadda dadaal kasta ayay ku bixindoontaa sidii ay nooga leexin lahayd ulajeedadeena:

﴿.... وَلَا يَزَالُونَ يُقَاتِلُونَكُمْ حَتَّى يَرُدُّوكُمْ عَنْ دِينِكُمْ إِنِ اسْتَطَاعُوا.....﴾

***(Kama daalayaan dagaalkiina ilaa ay idinka saaraan diintiina haddayba awoodaan)***

Waxayna isku dayi doonaan in ay nagu been abuurtaan dadkana ay u fool xumeeyaan dacwadeena ayagoo nagu eedaynayo waxyaaba aannaan samayn.

Annagu haddii ay nagu cabsigeliyaan awooda ay ku faanayaan iyo qalabkooda warbaahinta ee baaxada wayn si ay noo argagixiyaan, waxaan dhihi doonaa sida ay yiraahdeen Asxaabtii **RASUULKA**:

﴿حــــــــسبنــــــــــا الله ونــــــعمالوكيــــــــــل﴾

***(Allaah ayaa nagu filan asagaana ugu fiican mid wakiil noo ah)***

***(Kuwa lagu yiri: war dadkii oo dhan ayaa isu soo bahaystay la dagaalankiina ee cabsada, taasi waxay u kordhisay iimaan waxayna yiraahdeen Allaah ayaa nagu filan asagaana ugu fiican mid wakiil noo ah)***

Nabi Huud wuxuu yiri markii la cabsigilayay:

﴿ إِنِّي تَوَكَّلْتُ عَلَى اللَّهِ رَبِّي وَرَبِّكُمْ مَا مِنْ دَابَّةٍ إِلَّا هُوَ آخِذٌ بِنَاصِيَتِهَا إِنَّ رَبِّي عَلَى صِرَاطٍ مُسْتَقِيمٍ﴾

***(Anigu Allaah ayaan tala saaratay asaga ayaa Rabbi Noo ah aniga iyo adinkaba, wax kasta oo dunidaan dhaqaaqane asagaa caynaanka u haya)***

Dagaalkooda nagama leexin doona bartilmaameedkeena waana ku sii socon doonaa- idin Allaah- gudashada muhimadda Allaah uu noo xilsaaray.

﴿يَا أَيُّهَا الرَّسُولُ بَلِّغْ مَا أُنْزِلَ إِلَيْكَ مِنْ رَبِّكَ وَإِنْ لَمْ تَفْعَلْ فَمَا بَلَّغْتَ رِسَالَتَهُ وَاللَّهُ يَعْصِمُكَ مِنَ النَّاسِ إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي الْقَوْمَ الْكَافِرِينَ﴾

***(Rasuulkiyow gaarsii dadka Risaalada Rabi kuu soo dhiibay, haddii aadan sidaa yeelin ma aadan gaarsiin Risaaladiisi, Allaah ayaa kaa ilaalinayo cadawga)***

Anaga waxaan ku kalsoonahay haddii aan dacwada Allaah ka run sheegno in Allaah Na taageerayo naguna sugidoona xaqaan, ilaa aan asaga kala kulanno anagoo ku toosan waddadii xaqa ahayd, uuna nagu rumoobay qawlkii Allaah:

﴿ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ رِجَالٌ صَدَقُوا مَا عَاهَدُوا اللَّهَ عَلَيْهِ فَمِنْهُمْ مَنْ قَضَى نَحْبَهُ وَمِنْهُمْ مَنْ يَنْتَظِرُ وَمَا بَدَّلُوا تَبْدِيلًا﴾

***(Mu'miniinta waxaa ka midah rag ka run sheegay wixii ay Allaah kula ballameen, qaarkood way dhinteen qaarkoodna way sugayaan waxna ma badalin)***

Allaah-sarreeyee- wuxuu yiri:

﴿ وَلَقَدْ سَبَقَتْ كَلِمَتُنَا لِعِبَادِنَا الْمُرْسَلِينَ **(171)** إِنَّهُمْ لَهُمُ الْمَنْصُورُونَ **(172)**وَإِنَّ جُنْدَنَا لَهُمُ الْغَالِبُونَ﴾

***(kalimadeena way u hormartay addomadeena aan soo dirsanay, ayaga ayaa ah kuwa loo gargaarayo, ciidankeenana ayaga ayaa guulaysanayo)***

Anagu waxaan rumaysanahay in guusha dhabta ah ay tahay xaqa oo lagu sugnaado, Allaah waxa uu naga doonayana laga hormariyo danaheena aduun, guuldarada dhabta ahna ay tahay xaqa oo cabsi darted looga tago ama gaalada xaggeeda loo dabca.

Anagu waxaan nahay shaqaale Allaah, sida uu doona ayuuna naga yeelayaa, ajirkeenana Allaah ayaa noo damaana qaaday, natiijada dacwadeena waxa ay ku dambannayso Allaah ayaa ku shaqa leh.

﴿يَا قَوْمَنَا أَجِيبُوا دَاعِيَ اللَّهِ وَآمِنُوا بِهِ يَغْفِرْ لَكُمْ مِنْ ذُنُوبِكُمْ وَيُجِرْكُمْ مِنْ عَذَابٍ أَلِيمٍ .... وَمَنْ لَا يُجِبْ دَاعِيَ اللَّهِ فَلَيْسَ بِمُعْجِزٍ فِي الْأَرْضِ وَلَيْسَ لَهُ مِنْ دُونِهِ أَوْلِيَاءُ أُولَئِكَ فِي ضَلَالٍ مُبِينٍ﴾

***(Qoomkeeniyow ajiiba qofka idinku yeerayo Diinta Allaah, oo Rabigiina rumeeya wuu idin dambidhafayaaye wuuna idinka badbaadinayaa cadaab xanuun badan. Qofkiise ajiibi waayo BAAQA Allaah meel uu kaga fakanayo ma jirto Arladaan gudaheeda mana jiraan Allaah wax ka daafici Kara, kuwa diida "BAAQAA" waxay ku suganyihiim baadinimo cad)***

Allaah waxaan waydiisanaynaa in uu camalkeena naga aqbalo, uuna ka dhigo mid asaga saafi u ah.

يــــا قـــــومنـــــا ألا هل بلغـــــــنا ؟؟

*Qoomkeeniyow xaqi ma idin soo gaarsiinay??*

.. اللـــــــــهم فـــــاشهـــــــد ..

*..Allow marqaati ka noqo...*

وآخر دعوانا أن الحمد لله رب العالمين.

جماعة الصادعون بالحق